

Xiriirka qofka guriga leh iyo kan kireeysanaya.

Qofka guriga leh ma kaa xiran karaa guriga? Qodobka sharciga [RCW 59.18.290](#)

- ❖ **RCW macnaheeda waxaa weeye qodobada sharciga gobolka Washington oo wax laga bedelay ama wax lagu daray. Waana sharciga hada looga dhaqmo Washington state.**

Maya. Qofka guriga leh kaama xiran karo guriga aad ka kireeysatay, qofka guriga leh ma uu sameyn karo;

Inuu furaha bedelo

Inuu fure cusub oo siyaado ah ku xiro guriga

Inuu kuu diido inaad guriga gasho

Kaama xiri karo guriga xataa hadaad la soo daahdo lacagta ijaarka

Qofka guriga leh waa inuu kaa dacweeyo maxkamada, loona ogolaado inuu guriga kaa saaro, intuu talaabo kale qaadin.

Qofka guriga leh ma jari karaa korontada iyo biyaha guriga aad ka kireeysatay? Qodobka sharciga [RCW 59.18.300](#)

Wuxuu jari karaa oo kaliya haduu guriga dayactir ku sameynayo. Ma jari karo korontada iyo biyaha hadii;

- Aad la soo daahdo lacagta kirada.
- Ama uu rabo inaad ka guurto guriga.

Sidoo kale waa sharci daro in qofka guriga leh uusan bixin lacagta korontada iyo biyaha si lagaaga goosto korontada iyo biyaha.

Maxkamada ayaad ka dacweeyn kartaa qofka guriga leh haduu kaa jaro korontada iyo biyaha. Hadii aad ku guuleysato dacwada garsooraha wuxuu ku xukumi karaa magdhaw dhan ilaa \$100 maalin walba oo aad eheyd koronto iyo biyo la'aan.

Qofka guriga leh ma qaadan karaa alaabta kuu taala guriga?

Wuxuu qaadan karaa alaabta hadii aad ka tagto oo aad dayacdo. Hadii aad ka tagto guriga aad kireeysatay. Qodobka [RCW 59.18.310](#). Siduu qabo sharciga Washington state guriga waad dayacday hadii labadaan arrimood dhacaan;

- Inaad la soo daahday lacagtii kirada.
- Inaad ku tiri qofka guriga leh waan ka guurayaa guriga, adoo afka uga sheegay ama warqad u diray. Qodobka [RCW 59.18.310](#).

Waa sharci daro in qofka guriga leh ku qoro heshiiska kirada guriga inuu qaadan karo alaabta adiga aad leedahay.

Qofka guriga leh haduu qaato alaabtaada, warqad u dir. Haduu alaabta soo celin la xiriir booliska. Maxkamada ka dacwee si aad ugu qasabto inuu kuu soo celiyo alaabta. Garsooraha wuxuu ku siin karaa magdhaw ilaa \$500 maalin walba oo alaabta kaa maqan tahay ilaa \$5000 guud ahaan.

Qofka guriga leh ma kaa kireeyn karaa guri burburay oo lagu dhawaaqay inaan la degi karin?

Qofka guriga leh ma kireeyn karo guri aan ka soo baxin dhamaan shuruudaha guryaha la kireeynayo. Qodobka [RCW 59.18.085\(1\)](#). Waad dacweeyn kartaa, magdhaw ayaadna ka raadsan kartaa hadii qofka guriga leh kaa kireeyay guri uu ogaa inuu ka soo bixin shuruudaha guryaha la kireeynayo. Qodobka [RCW 59.18.085\(2\)](#).

Qofka guriga leh ma kaa daba imaan karaa wax aad sameysay darteed? Qodobka [RCW 59.18.240](#)

Qofka guriga leh kaama daba imaan karo hadaad ku dacweeyso si sharciga ku saleeyan.

Tusaale;

1: Hadaad maamulka dowlada hoose u sheegto in guriga lagaa kireeyay uu leeyahay dalool saqafka ku yaal, isla

markaana dawlada hoose ku tiraahdo qofka guriga leh baaritaan ayaan gurigaaga ku qaadeynaa. Markaan kadib hadey dhacdo in qofka guriga leh kugu kordhiyo kirada guriga asagoo kaa gudanaya waxaad u sheegtay dowlada hoose.

2: Hadaad qofka guriga leh u sheegto inaad ka goosaneyso lacagta ijaarka kharash kaaga baxay dayactir aad guriga ku sameysay. Haddii markaan kadib qofka guriga leh kaa goosto kuleelka guriga. Kuleelka guriga shaqo kuma laha dayactirka aad guriga ku sameysay.

Haddii qofka guriga leh talaabo dhib ah kugu qaado 90 maalmood gudahood markii aad si sharciga waafaqsan u dacweeysay, arrintaan waxay noqon inuu kaaga daba yimid si sharci darro ah. La tasho qareen hadey kuula muuqato in qofka guriga leh uu kaa daba yimid, kaana gudanayo maadaama aad dacweeysay. Waxaa dhaci karta inaad dacweeyn karto oo magdhaw heli karto.

This publication provides general information concerning your rights and responsibilities. It is not intended as a substitute for specific legal advice.

This information is current as of April 2018.

© 2018 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Permission for copying and distribution granted to the Alliance for Equal Justice and to individuals for non-commercial purposes only.)